Baadhista Maqalka Dhawaan lasameeyay-dhalaanka Macluumaadka Dhalashooyinka Guriga

Maqalka iyo xidhiidhku aad ayey muhiim ugu yihiin koboca ilmahaaga. Carruurta ku dhasha guryaha ma maraan baadhista maqalka ee dhawaan-dhaladka. Hase yeeshee, waxa muhiim ah inaad tixgaliso in ilmahaaga lagu sameeyo baadhista maqalka.

Maqal beelku waa mid ku badan carruurta iyo dhawaan-dhaladka waana adag tahay in la ogaado. Maqal beelku ma muuqdo, calaamadaha maqal beelkana sida badan waa la ilduufaa ilaa ilmuhu waynaado. Calaamadaha maqal beelka qaarkood waxa kamid noqon kara dib-u-dhac hadalka iyo luuqadda, dhibaatooyin xagga habdhaqanka ah, iyo/ama dib-u-dhac koboceed.

Muxuu baadhista maqalka dhawaan-dhaladku muhiim ugu yahay ilmahayga?

Samaynta baadhis maqal isla markii ilmuhu dhasho waa qaab dhakhso ah oo sahlan oo loo ogaado maqal beelka. Baadhis maqalka ah waa in dhakhso loo sameeyo kadib markii ilmuhu dhasho waxaana la samayn karaa ilmaha oo hurda ama deggan.

Halkee ayaan gayn karaa ilmahayga si loogu sameeyo baadhista maqalka dhawaan-dhaladka?

Waaxda caafimaadka deegaankaaga ayaa ku siin doonta liis ah goobaha samayn kara baadhista maqalka dhawaan-dhaladka. Liiskan waxa loo yaqaan Diiwaanka Adeegyada Maqalka Carruurta ee baadhista maqalka Bukaan-socodka.

Sidee ayaan u qabsadaa ballan baadhista maqalka dhawaan-dhaladka?

Eeg Diiwaanka Adeegyada Maqalka Carruurta si aad u ogaato goobta degmo kasta ee qaybta Baadhista Bukaan-socodka. Markii aad hesho goobta, waxaad wici kartaa lambarka ku qoran si aad u qabsato ballan baadhista maqalka dhawaan-dhaladka. Sidoo kale waxa jira liis ah caymisyada ay qaadato goob kastaa.

Ka waran haddii ilmahaygu aanu gudbin baadhista maqalka una baahan yahay baadhitaan dheeraad ah?

Kadib markii ilmahaagu maro baadhista maqalka dhawaan-dhaladka, dhakhtarka maqalku wuxuu kula wadaagi doonaa natiijooyinka wuxuuna ku siin macluumaad muhiim ah oo la xidhiidha korriinka ilmahaaga. Haddii ilmahaagu aanu gudbin baadhista maqalka, baadhitaan dheeraad ah oo loo yaqaan qiimaynta maqalka ayaa loo baahan yahay.

Qiimaynta maqalku waa inay si dhakhso ah u dhacdaa. Waxa ugu fiican in la baadho inta ilmuhu ka yar yahay 3 bilood. Carruurta ka yar 6 bilood waxay awoodaan inay hurdaan inta baadhitaanku socdo. Carruurta ah 6 bilood iyo ka wayn waxay u baahan karaan in la suuxiyo si ay u sii hurdaan iyadoo la adeegsanayo daawo gaar ah oo loogu talogalay baadhitaanka.

Mararka qaar, isla goobta baadhista samaysa ayuunbaa samayn karta qiimaynta maqalkana. Haddii goobtu ayna samayn karin qiimaynta maqalka, dhakhtarka maqalku wuxuu ku siin doonaa liiska goobaha kujira Diiwaanka Adeegyada Maqalka Carruurta ee meelaha Qiimaynta ama wuxuu kaa caawin inaad qabsato ballanta qiimaynta maqalka.

Ka waran haddii ilmahaygu qabo maqal beel?

Haddii maqal beel laga helo, dhakhtarka maqalku wuxuu u diri karaa ilmahaaga xagga dhakhtarka Dhagaha, Sanka iyo Cunaha. Ilmahaaga waxa sidoo kale loo gudbin barnaamijka Wax-ka-qabadka Xilliga Hore kaasi oo ka caawin kara qoyskaaga xoojinta barashada iyo koboca ilmahaaga iyadoo loo marayo hawlaha maalin kasta.

Ayaan wici karaa haddii aan qabo su'aalo dheeraad ah?

Waaxda Caafimaadka Ohio- Barnaamijka Maqalka Carruurta ayaa ka jawaabi kara su'aalaha kusaabsan baadhista maqalka, qiimaynta maqalka ama macluumaadka kale.

La xidhiidh Waaxda Caafimaadka Ohio- Barnaamijka Maqalka Carruurta:

- Kaalmada Baadhista Maqalka Carruurta: (614) 387-0135
- Kaalmada Qiimaynta Maqalka ee Carruurta: (614) 728-4676
- Iimeyl: infanthearingprogram@odh.ohio.gov
- https://www.odh.ohio.gov/odhprograms/cmh/Infant%20Hearing/About%20Infant%20Hearing.aspx

Ohio
Department of Health